

## Maktabadaha Dadweynaha ee Vermont

### Waa maxay mактабадда dadweynaha?

Maktabadaha dadweynaha waa goobo waxbarasho, kahellid, iyo iscaawin shaqsiyed oo waxaa la siiya fursado dadyowga da'a walba ah iyo asal walba ah si ay u bartaan ama u sii wadaan is hormarida shaqsiyed. Maktabadu waxay inta badan bixiyaan agab ay booqdeyaashu qaadan karaan, iyo sidoo kale isticmaalka dhismaha iyo adeegyada. Shaqaalaha maktabadda ayaa caadi ahaan diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalaha oo ay ka caawiyaan booqdayaasha isticmaalka maktabadda.

### Maxay bixiyaan maktabadaha dadweynaha?

Inta badan agabka maktabadda waxay macaamiishu qaadan karaan in muddo ah, ka dibna lagu soo celiyo maktabadda iyada oo aan wax kharash ah uu san bixinin macmiilka. Qalabka waxaa ka mid noqon kara:

- Buugaagta dadka waaweyn iyo carruurta
- Wargeesyada
- Qalabyada
- Buugaag maqal ah iyo muusig
- \Joornaallada
- Aflaanta

Maktabado badan aya u bixiyaan munaasabado bilaash ah booqdayaasha. Waxaa jira munaasado badan oo noocy badan oo ay maktabaduhu bixiyaan:

- Munaasabadaha waxbarashada ee dadka waaweyn iyo carruurta
- Munaasabadaha fanka
- Waqtiyada sheekada iyo hawlaha kale ee carruurta
- Munaasabadaha muusiga

Maktabado badan ayaa sidoo kale siiyan booqdeyaashooda tignooliji. Noocyada tignoolajiyada waxaa ka mid noqon kara:

- Kumbuyutarrada leh isticmaalida internet-ka
- Wi-fi bilaash ah
- Buugaag qaab elektaroonik ah
- Daabacadaha iyo iskaanka
- Adeegyada internetka iyo fasalada

Maktabadaha badanaa waxay leeyihii adeegyo aasaasi ah oo loogu talagalay booqdayaasha:

- Fadhiyada
- Qolalka musqulaha iyo biyaha la cabbo
- Misas lagu qabto shaqada iyo leyliga guriga
- Qolalka shirarka ama goobaha waxbarasho ee xasilloon

### Sideed xubin uga noqon kartaa maktabadda?

Xubnimada maktabaddu waa bilaash haddii aad ku nooshahay isla magaalada ay maktabaddu ku taalo. Maktabadaha intooda badani waxay ku weydiin doonaan magacaaga, cinwaankaaga, iyo lambarka

telefoonka ama cinwaankaaga iimaylka. Maktabadaha qaarkood waxay ku weydiyaan AQQOONSIGAAGA. Maktabadu cidna lama wadaagto macluumaadkaaga shakhsiyed ilaa sharcigu farayo. Inta badan, uma baahnid inaad xubin ka noqoto maktabadda si aad u booqato maktabadda.

### **Hel jawaabaha su'aalaha**

Shaqaalahi laybareeriga ayaa laga heli karaa jawaabta su'aal kasta oo isticmaalahi laybareerigu uu ka qabo wax. Xataa hadii shaqaalahi laybareerigu uu ka jawaabi kari waayo su'aashaada isla markaba, waxa uu samayn doonaa baadhitaan oo wuu kugu soo warcelin doonaa marka uu helo jawaabta.

### **Ku hel macluumaad onleyn (Kaydka macluumaadka)**

Marka laga tago buugta, shaqaalahi laybareerigu waxay ku siin karaan macluumaad onleyn ah oo kaydka xogta ku jira. Kaydadkan macluumaadka waa u bilaash dadka oo waxaa ka buuxa maqaalo, buug elektorooni ah, fiidyawyo, iyo sawiro kaa caawin kara wixii macluumaad ah ee aad u baahan tahay. Waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan wax kasta oo ay ka mid yihiin xogta daraasad cilmiyeedka, maqaalo iyo tilmaamo mashruuca gurigaaga iyo waxyaabaha aad xiisayso oo waxaa weeye meel wanaagsan oo aad macluumaadka onleyinka ah ka heli karto.

### **Hel buugaag**

Shaqaalahi laybareeriga ayaa kaa caawin kara inaad hesho buug marka aad garanayso cinwaankiisa ama qoraaga. Waxay sidoo kale kaala talin karaan buugga xiga ee aad doonayso inaad akhrido iyaga oo eegaya waxa aad xiisaynayso iyo macluumaadka aad u baahan tahay.

Laybareerigaagu waxaa dhici karta in aanu haynin buugta oo dhan ee aad doonayso inaad akhrido marka aad booqato. Nasiib wanaag, shaqaalahi laybareeriga ayaa kaa caawin kara inaad ka ammaahato buugta laybareeriyo kale oo gobolka ah iyo wixii ka baxsan. Shaqaalahi laybareeriga ayaa kaa caawin kara inaad ka ammaahato buug laybareeriyo kale iyada oo la adeegsanayo Interlibrary Loan. Marka buuga aad dalbatay uu yimaado, waxa aad ka qaadan kartaa oo aad kusoo celinaysaa si toos ah laybareeriga deegaankaaga.